



do 1 thing

Himilada Do 1 Thing waa inay ku dhaqaajiso ashkhaasta, qoysaska, ganacsiyada iyo bulshadu inay u diyaargarobaan halisaha oo dhan ooy noqdaan qaar masiibada u adkaysta.

YOOLKA: Hubi in qofkasta gurigaaga ahi uu heli karo, fahmo, oo ku dhaqmo macluudka la hello xaalda gurmada ah.

Xogogaal noqoshada

Helidda macluumaad sax ah xilliga xaaladda gurmada ah waxay muhiim u tahay qaadida tallaabo amaana. Qof gurigaaga ka mid ah waxa laga yaabaa in aanu awoodin in uu helo. Fahmo, ama ku dhaqmo macluumaadka xaaladda gurmada. Ka fikir dadka baahiyaha gaarka qaba ee laga yaabo in ay gurigaaga joogaan. Tallaabo qaad imika aad ku hubinayso in qof kasta oo qoyskaaga ka mid ahi uu noqon doon amaana xaaladda gurmada ah.

Dooro mid kamida waxyaalahan soo socda si aad u samayso bishan si aad si fiican ugu diyaargarawdo:

- Hubi in qof kasta oo qoykaaga ka mid ahi uu garanaayo waxa la sameeyo marka ay maqlaan digniinaha xaalada gurmada ah.**

Bulshadaadu waxa laga yaabaa in ay haysato qaylo-dhaan digniina oo debada ah (sidoo kale waxa loo yaqaanaa qaylo-dhaanta tornaadada) si ay kuugu baraarujiyaan xaaladda gurmada ah. Qaylo-dhaantan waxa loogu talagalay in ay ogaysiiso dadka debadda jooga in ay tahay in ay gudaha galaan oo ay helaan macluumaad badan. Marka aad maqasho codka qaylo-dhaanta digniinta ee debada ee bulshadaada ma aha amaankaaga in aad debada joogto. Waa in aad isku qarisa dhisme adkaysi leh ood ka heshaa macluumaad badan tilifishanka, raadyawga, internetka, ama la xidhiidh saaxiib ama xubin qoyska ah.

Wac waaxda dabka deegaankaaga si aad u ogaato haddii meeshaada lagu daboolay qaylo-dhaanta digniinta, marka la tijaabinayo, iyo marka laga shaqaysiinayo. Hubi in xubno kale oo gurigaaga ahi ay garanayaan waxa la sameeyo marka qaylo-dhaanta digniinta debaddu uu qaylo.

Bulshooyinka qaar ayaa waxa ay leeyihiin dariiqooyin kale oo digniino deegaan ah. Waxa laga yaabaa in ay wacaan tilifoon, ama diraan fariin ama u iimayliyaan macluumaadka xaaladda gurmada ah. Ogow nidaamyada kale ee digniinta ee bulshadaadu ay haysato iyada oo la xidhiidhaysa maaraynta xaalada gurmada ah ama xafiiska bilayska. Kala hadal xubnaha qoyska wax kusaahsan waxa la samaynayo marka macluumaad xaaladda gurmada la siiyo.

Hel NOAA Raadyawga Digniinta Xaalada gurmada ah.

Cimiladu waxa ay isku beddeli kartaa si degdeg ah. Cimilo halis ah ayaa dhici karta marka dadku ay hurdaan ama ayna ka warqabin saadaasha. Tani dhimasho ayey keeni kartaa haddii ayna dadku raadsan hooy amaana. Raadyawga digniinta xaaladda gurmada NOAA (mararka qaar waxa loogu yeedhaa raadyawga cimilada) iskiibuu isku shidi karaa marka digniin xaalad gurmada ah uu dareemo oo wuu kuu digi karaa wakhti kasta- maalin ama habeen.

Raadyawiyada digniinta xaaladda gurmada ayaa loo isticmaali karaa si ay uga digaan xaalado kale oo gurmada ah, sida kimiko qubatay. Raadyawga Digniinta Xaaladda gurmada, waxa lagaaga digi doonaa xaaladda khatarta ah wakhtiga aad hooyga hesho ama tallaabooyin kale oo amaana.

Guri kastaa waa in uu haystaa raadyawga digniinta xaalada gurmada ah, sida dhammaan guryuhu ay tahay in ay u haystaan qiiq dareemaha. Waxa ay ka iibsaa karaan tukaanada iibiya elaktarooniga. Qiimuhu waxa uu ka bilaabmaa \$20.00. Inta ugu badan waxa ay ku shaqeyaan beetariyo ama waxa ay haystaan beetari kaabe.

Hubi in cidkasta oo gurigaaga ahi ay la tacaali karto masiibada.

Habka macluumaadka xaaladda gurmada loogu diro bulshadaadu waxa laga yaabaa in ay u shaqayn waydo cidkasta. Haddii aanad si fiican Ingiriiga ugu hadal, ama haddii aad isticmaasho qalab caawiye ah si aad u hadasho ama u maqasho, qorshe samee imika si aad u hubiso in aad heli karto ood macluumaad ka bixin karto masiibada.

Bulshada waxa laga yaabaa in uu siiyo macluumaadka tilifishan ama raadyaw, tilifoon is wacaya, fariin, iimayl, ama dhaqaaqista qaylo-dhaanta digniinta ee debada. Booliska ama damdamisku waxay isticmaalaan codad dhaadheer si ay macluumaad u bixiyaan marka ay suuqa dhex marayaan. Tabarucayaal ayaa laga yaabaa in ay tagaan albaab ilaa albaab si ay dadka si toos ah ula hadlaan.

Haddii aad u malaynayso in aanad awoodin in aanad fahmi karayn macluumaadka xaalada gurmada ah, aqoonso qof (ama in ka badan hal qof) oo aad la xidhiidho si uu kaaga caawiyo xaalada degdega ah. Yeelo in ka badan hal dariiqo si aad ula xidhiidho. Sii wad xidhiidhkooda macluumaadka.

Macluumaadka Gurmada: Waxyaabaha ay tahay in laga fikiro ...

- Warka xaaladda gurmada ah ama baahinta cimiladu waxa dhici karta inayna isku qoraal dhawaan.
- Macluumaadka shaashadda ka muuqata waxa dhici karta inaan hadal lagu soo koobi karin.
- Codadka iswadaa ama cod-baahiyayaasha waxa dhici karta inay adkaato in la fahmo.
- Macluumaadku dhakhso ayuu u yimaadaa cadaadiska masiibaduna wuxuu ka dhigi karaa adayg in la fahmo ama xasuusto tilmaamaha.
- Erayada socda xagga hoose ee tilifishanka waxay u socon karaan dedeg.
- Midabka shaashadda ama midabka qoraalka waxay ka dhigi karaan macluumaadka qaar adayg in la akhriyo.